

Tirinta

Shaxda Ikhtiyaarka

Ilmahaaga waxa aad u sheegtaa inuu doorto hal ama wax ka badan oo hawlaha hoose ah. Waxa aad samaysaa ikhtiyaar oo waxaad daba gashaa xirfadaha muhiimka ah ee garaadka iyo hormarka dareenka bulshada. **Ka dooro hawlaha soo socda si aad u ogaato waxa uu ilmahaagu ka garanayo tirinta.**

Su'aalaha La Waydiinayo:

- Marka la tuso shay yar oo (1-5) oo shay ah, ilmahaagu ma aqoonsan karaa inta shay ee ay tahay isaga oo aan tirin? Imisa ayuu aqoonsan karaa ilmahaagu?
- Miyaad siin kartaa laba shay, miyuu ilmahaagu sheegi karaa isugayn tirada isaga oo tirinaya dhamaan ama mid-mid u tirinaya?

<p>Tilmaamaha Qoyska: Ku dhiiri geli ilmahaaga inuu garto inta mid ee ay yihiin xidhmada yar ee shayada ah iyada oo aan la tirin. U ogolaw caruurtaada inay tiriyaan shayada oo ay isticmaalaan farahooda si ay u gartaan wadarta tirada u dhaxaysa laba lambar.</p>	<p>Kala saara: Waxa aad heshaan tiro yar oo shayo ah (badhan, shilimaan, dhagaxaan). Ilmahaagu ha go'aansado qaabta uu u kala saarayo shayada. Ilmahaagu hakala saaro shayada oo waxa aad ka warantaa qaybaha/kooxaha. Imisa ayaa koox kasta ku jirta? Waa meeqa dhamaantood? Ma heli kartaa qaab kale oo loo kala saari karo?</p>	<p>Gudaha/Banaanka: Soo uruuri toban shay oo si amaan ah loo tuuri karo. Waxa aad ridaa weel wayn oo markaa ku filan in shayada lagu dhax tuuro ama waxa aad la timaadaa qaab ikhtiraac ah oo aad u samayso goobaab dhulka ah (xariijin, xadhig, inaad ku sawirto goobaab camuuda,). Waa in kolba midkiin ku tuuraa shayada weelka ama goobaabta. Waxa aad ka warantaan inta shay iyo inta dhax ee banaanka ee ay leedahay. Waxa aad waydiisaa hadii ay jiraan wax badan iyo wax yar.</p>	<p>Shayada Qarsoon: Waxa aad la tiriraa shan shay ilmahaaga. Dheh, "Isku qabo indhahaaga." Waxa aad shan kamid ah shayada hoos dhigtaa wax qarabaya oo waxa aad kuwana ku daysaa banaanka la arkayo. U sheeg ilmahaaga inuu yidhaahdo "Shazam!" (ama kalmad kale oo xiiso leh) oo uu markaa kala qaado indhihiisa. Dheh, "Imisa [magaca alaabta] ayaad aragtaa?" Waydii, "Imisa [magaca alaabta] ayaad u malaynaysaa inay ku hoos qarsoon yihiin daboolka?" Ka qaad</p>
---	---	--	--

<p>Imisa farood? Waxa aad qabataa (2-10) farood mudo sadex ilbidhiqsi ah. Waydii ilmahaaga "imisa?" si loo ogaado hadii isaga/iyadu ay garan karto tirada iyada oo aan tirin.</p>	<p>Qaybaha Jidhka:Ilmahaagu ha helo qaab uu ku ogaanayo tirada indhaha, gacmaha, ama lugaha uu qoysku leeyahay.</p>	<p>Dhakhso u Sawiro:Waxa aad ku sawirtaa ilaa 5 dhibcood warqad oo markaa qari. Waxa aad qaristaa dhibcaha ilaa 3 ilbidhiqsi si aad u ogaato hadii ilmahaagu garan karo inta midh ee ay yihiin. Waxa aad isku daydaa lambar kale.</p>	<p>daboolka oo waydii, "Marka la isku daro waa imisa?" Waxa aad waydiisaa kooxda badan, yar, ama isku midka ah. Waxa aad iskugu habaysaa tiro badan ama yar oo ilaa 10 ah.</p>
--	---	---	--

